Daboolista Qorshaha Caafimaadka Oregon Inta lagu jiro Xaaladda Degdegga ah ee COVID-19

Daboolista Qorshaha Caafimaadka Oregon inta lagu guda jiro Xaalada degdegga ah ee COVID-19

Inta lagu jiro xaaladda degdega ah ee COVID-19, waxa dhici karta inaad sii haysato caymiskaaga Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) maadaama ay jiraan isbaddalada dhanka siyaasaddu, xitaa haddii aad isbeddel ku samaysay noloshaada,sida inaad lacag badan samaysay.

Caafimaadkaaga waa muhiim. Fadlan sii joogtee isticmaalida OHP-gaaga si aad daryeel uga hesho dhakhaatiirtaada, kalkaaliyayaashaada, dhakhaatiirtaada ilkaha, iyo daaweeyeyaashaada.

Ma dooneysaa macluumaad dheeraad ah? Halkan guji si aad u hesho wax badan oo ku saabsan faa'iidooyinka OHP.

Noo soo sheeg isbedelada nolosha si aan u ilaalino caymiskaaga mid cusub oo aanu kula xidhiidhi karno OHP gaaga.

Mid ka mid ah kuwan soo socda ma khuseeyaa adiga ama qof qoyskaaga ka tirsan? Haddii ay sidaas tahay, fadlan isla markaaba noo soo sheeg.

- Cinwaan cusub ama guri?
- Ma guursatay mise waa la furay?
- Si sharci ah u bedelay magaca ama calaamadeeyaha jinsiga?
- Uur ma leedahay, ma umushay, mise wuu dhacay?
- Ma heshay shaqo cusub mise shaqo weyday?

Liiska sare waa tusaalayaal caadi ah. Riix halkan si aad u akhrido tusaalooyin badan oo isbedel nololeed oo aad u baahan tahay inaad ka warbixiso.

Waxaad u sheegi kartaa isbaddalada OHP:

- **Onleenka:** Gal xisaabtaada ONE adiga oo booqanaayo ONE.Oregon.gov.

- **Si fool-ka-fool ah:** Dadku booqan karaan Xafiiska Waayeelka iyo Dadka Naafada ah, Hay'adda Aagga ee Waayeelka ama Barnaamijyada Isku-Fillaanshaha, meel kasta oo ay ka joogaan Oregon, si ay caawimo u helaan. Halkan guji si aad u hesho xafiiska deegaankaaga.
- **Taleefoon ahaan:** 1-800-699-9075 (TTY 711). Isniin ilaa Jimce: 7da subaxnimo ilaa 6da galabnimo (PST). Wakhtiyada sugitaanka wicitaanku wuxuu wakhtigan ugu hooseeya subaxdii laga bilaabo 7 ilaa 8 a.m.
- Halkan guji si aad u akhrido qaabab badan oo aad u tabin karto isbaddalada. .

Maxay tahay waxa aan sameynaayo haddii boostada la iigu soo diro warqad ku saabsan OHP-gayga?

Waxaa laga yaabaa inaad boostada ku hesho warqad ku saabsan OHP-gaaga. Waxaan kuu soo dirnaa warqadaha cusbooneysiinta sanad walba oo aad leedahay OHP. Fadlan ka jawaab waraaqadda haddii aanu ku waydiisanno macluumaad dheeraad ah, sida caddaynta dakhliga, si aad u sii wadato inaad hesho dhammaan waxtarrada OHP ee saxda ah.

Waraaqdu waxay kuu sheegi doontaa waxa ay tahay inaad noo soo dirto iyo goorta aad soo dirayso. Markaad hesho waraaqdaada, waxay ku farayso isla markiiba samee.

Miyaad u baahan tahay caawimo ka jawaabidda waraaqdaada?

- **Si fool-ka-fool ah:**
  - Booqo xafiiska OHS ee Waayeelka iyo Dadka Naafada ah ama Barnaamijyada Isku-Fillaanshaha, ama xafiiska Hay'ad Aag oo Waayeelka Qaabilsan (Area Agency on Aging, AAA). Horay u wac ka hor inta aadan booqanin. Halkan guji si aad u hesho xafiiska deegaankaaga.
  - Caawimo ka raadso la-shaqeeye bulsho oo tabobaran. Booqo OregonHealthCare.gov si aad u heshid la-shaqeeyeyaal bulsho ee jooga aaggaaga.
- **Taleefoon ahaan:** 1-800-699-9075 (TTY 711) Isniin-Jimce 7 a.m. ilaa 6 p.m. (PST). Wakhtiyada sugitaanka wicitaanku wuxuu wakhtigan ugu hooseeya subaxdii laga bilaabo 7 ilaa 8 Subaxnimo.

Ma u baahan tahay caymis caaafimaad? Codso OHP maanta.

Waxaad isku diiwaangalin kartaa OHP-ga wakhti kasta oo sanadka ka mid ah. Waxaad ku codsan kartaa mid ka mid ah qaababka soo socda:

- **Onleenka:** Codso adiga oo booqanaya ONE.Oregon.gov
- **Si fool-ka-fool ah:** Ka hel caawimaad bilaash ah iskaashatada bulshada ee tababaran ee ku teedsan gobolka oo dhan. Booqo OregonHealthCare.gov si aad u heshid la-shaqeeyeyaal bulsho ee jooga aaggaaga.
- **Ma dooneysaa macluumaad dheeraad ah?** Ka baar codsiga bogga mareegta OHP.

Su'aalaha iyo Jawaabaha

Haddii aniga ama qof ka mid ah qoyskayga aanu lacag badan samaynay ilaa March 2020, ma sii joogi karaa OHP?

Haa. Inta lagu guda jiro xaaladda degdega ah ee COVID-19, waad haysan kartaa OHP-gaaga, xitaa haddii adiga ama qoyskaagu sameeyo lacag ka badan xaddiga loogu talagalay OHP.

Inta lagu jiro COVID-19 xaalad degdeg ah, sidee OHP-gayga u dhammaan karaa?

Inta lagu jiro xaaladda degdega ah ee COVID-19, waxtarrada OHP waxay dhammaan doonaan oo keliya xubnaha qaar. Sababaha ugu badan ee aan u xiri doono dheefaha OHP waa haddii xubintu:

- Aad xabsiga
- Waxay noo sheegtaa inaan joojino OHP-gooda
- Waxay ka guureen Oregon oo waxay noqdeen degane gobol kale
- Way dhintaan

Xaalado badan oo OHP-gaagu ku dhamaan doono**,** hubi buug-gacmeedka xubinta OHP.

Maxaa ku dhici doona dheefaha OHP ka dib xaalada degdega ah ee COVID-19?

Intii lagu jiray xaaladdii degdega ahayd ee COVID-19, xubnaha aan hadda u qalmin OHP waxay awoodeen inay sii joogaan isbeddellada siyaasadda awgeed. Isbaddalada siyaasadda ee kumeel gaarka ah waxay dhammaan

doonaan ka dib xaaladda degdegga ah ee COVID-19. Markay taasi dhacdo, OHA waxay bilaabi doontaa inay dib u eegto u-qalmitaanka OHP ee dhammaan 1.4 milyan oo xubnood iyo xubnaha aan hadda u qalmin waxay lumin karaan OHP-gooda.

Waxaan rabnaa inaad u diyaargarowdo isbeddellada OHP ka dib xaaladda degdegga ah ee COVID-19. Akhri wax badan oo ku saabsan sida loogu diyaargaroobo isbeddeladan.

Waxaad ku heli kartaa waraaqdan luuqado kale, far waawayn, qoraalka Camoolka ama qaabka aad doorbidi. Sidoo kale waxaad codsan kartaa tarjumaan. Caawimadani waa bilaash. Wac 800-699-9075 ama TTY 711. Waxaan aqbalnaa wicitaanada dadka naafada ah.

OHP.Oregon.gov